IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannnadka 12aad Muqdisho 30ka Maajo 1984 L. 2 R 5

لجمهورية الصومال الديمقراطية

FAAFIN BIL SOO BAXA جريدة شهرية

**QIIMADU:** waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA:** Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudeheeda - dibaddedana waa Shs. 300. Rubunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilabmaa 1 Janaayo. Qiimaha qortitaanku F. R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. Rukunka iyo qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

SHARCI L. 18 ee 22 Maarso 1984, Oggolaansho heshiis ku saabsan Abuuridda Sanduuq La-wadaago ee Badeecadaha BOG. 347

SHARCI L. 19 ee 28 Maarso 1984, U rogid Sharci Xeerka Sharciga lam. 3 ee 8.3.84 kordhin muddo fasax qalab iyo badeeco » 378

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA, L. 12 ee 25 Jen. 1984, meel marin Wadiiqadaha kalfadhigii Shirka Guud ee Ururka Boostada Caalamiga (U.P.U.) Shirka Rio de Janeiro 1979. » 349

DECREE N. 12 on 25 Jen. 1984, Instruments of ratification of the U.P.U. Convention Rio de Janeiro 1979. » 350

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA. L. 13 ee 25 Jen. 1984, meel marin heshiiska Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (I.T.U. Convention) Kalfadhigii Shirka Nairobi 1982.— 351

DECREE N. 13 on 25 Jen. 1984, Instruments of ratification of the I.T.U. Convention Nairobi Congress 1982. » 352

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA. L. 14 ee 25 Jen. 1984, meel marin Wadii qadaha Kalfadhiga Ururka Boostada Carbeed ee 11aad Shirka Baqdaad 1980 » 353

القانون رقم ١٥ — ٢٥ يناير ١٩٨٤
الموضوع : تصديق على الاتفاقية الاتحاد العربي للاتصالات السلكية واللاسلكية مؤتمر تونس — الحمامات عام ١٩٨١ ٣٥٤

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA. L. 15 ee 25 Jen. 1984, meel marin heshiiska Ururka Isgaarsiinta Carbeed Shirka Tuunis (Alxammaamaat) 1981. » 355

القانون رقم ١٤ — ٢٥ يناير ١٩٨٤
الموضوع / تصديق على الوثائق موتمر بغداد الحادى عشر للاتحاد البريد العربى عام ١٩٨٠م ٣٥٦

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA. L. 16 ee 25 Jen. 1984, meel marin Wadii qadaha heshiiska Ururka Boostada Afrikaanka (Pan Afrikan Postal Union) (P.A.P.U.) Kalfadhigii Arusha 1980. » 357

DECREE N. 16 on 25 Jen. 1984, Instruments of ratification of the P.A.P.U. Convention Arusha 1980. » 358

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA, L. 17 ee 25 Jen. 1984, meel marin iyo ku biirid waduqadaha heshiiskaUrurka Isgaarsiinta Afrikaanka (Pan Afrikan Telecommunication) (P.A.T.U.) Kalfa dhigii shirka kinshasa Jannaayo 1982. » 359

DECREE N. 17 on 25 Jen. 1984, Istrumennt of ratification and acceion to the con vention of the P.A.T. Kinshasa cong reess January 1982.— » 360

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA, L. 18 ee 22 Maar. 1984, meel marin he shiis ku saagsan Auurid Sanduuq la-wa daago ee Badeecadaha » 362

DECREE N. 18 on 22 Marsh 84, Instrument of ratification— » 363

XEER MADAXWEYNAHA J.D. SOM/YA L. 19 ee 1 Maajo 1984, ku wareejin waa xda isku duuwidda Qorsheynta Qaran ka waxaa lagu wareejiyey W. A. Dib/da » 364

XEER Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare L. 2 ee 4.3.84 Abuuritaanka Kulli yadda Macallimiinta Farsamada. — 365/bis

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH—

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 29.4.84, Lumid Buug Keyd L. 3063 ku qoran Maryan Xasan Weheliye L. 134 » 366

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17.4.84, Lumid Buug Keyd L. 20662 ku qoran Xuseen Guuleed Cali L. 135 » 367

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 8.3.84, Lumid Buug Keyd L. 1036/83 ku qoran Saciid Cismaan Jumcaale L. 136 » 368

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 3.5.84, Lumid Buug Keyd L. 3317 ku qoran Maxamed Xaashi Cilmi L. 137 » 369

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.84, Lumid J. War. L. 51411 ku qoran Saalax Saalim Saciid L. 138 » 370

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 607422 ku qoran Saajac Cabaas Markhaat L. 139 » 371

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.5.84, Lumid Jeeg War. L. 514116 ku qoran Saalax Saalim Saciid L. 140 » 372

MAXKAMADDA GOBOLKA SH. HOOSE, 205.84 Lumid Buug Kayd L. 2581 ku qo Maxamed Nuur Muuse L. 141 » 373

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 21.5.84, Lumid Jeeg War. L. 371933 ku qoran Ciise Faahiye Samantar L. 142 » 374

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 22.5.84, Lumid Buug Keyd L. 114 ku qoran Maxamed Xasan Axmed L. 143 » 375

DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO, 25.5.83, Naado Dhul J/le Cali Boobe Faqay L. 144 » 376

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.5.84, Lumid Jeeg War. L. 405062 ku qoran Cabdikariim Max'ud Cilmi L. 145 » 377

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 27.5.84, Lumid Buug Kayd L. 493 ku qoran Ibraahim Gacal Wardheere L. 147 » 378

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.5.84, Lumid Jeeg War. L. 279961 ku qoran Qaali Aadan Waceys L. 146 » 379

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 18 taariikh 22 Maarsoo 1984 Oggolaansho Heshiis ku saabsan Abuuridda Sanduuq La wadaago ee Badeecadaha.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaansa Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

Wuxuu Soo Saarayaa Sharciga Soo Socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday meel marinta ku biiridda J.D.S. Heshiiska lagu abuurayo Sanduuq la wadaago ee Badeecadaha oo u dhexeeya Dalalka Dunida oo heshiis ka xubin ka ah.—

2. Heshiiska kor ku tilmaaman waxaa lagu gud doonsaday magaalada Jeneva ee Dalka Svizzera taariikhdu markay ahayd 27 Juunyo 1980.

3. Heshiisku wuxuu ka mid yahay sharcigan, isagoo lifaaq u ah.—

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada heshiiska ku tilmaaman qod. 1aad ee sharcigan, wuxuu leeyahay qiimo iyo astaan sharci la heer ah sharciyada iyo xeerarka Dalka, waxaana dhaqan gelintooda la waafajinayaa Dastuurka J.D.S. Iyo heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha J.D.S. Waxaa awood loo siiyey inuu meel mariyo heshiiska sharcigan ku tilmaaman.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda

Muqdisho. 22 Mar. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

Sharci Lambar 19 taariikh 28 Maarso 1984 U rogid Sharci Xeerka Sharci lambar 3 ee 8 Maarso 1984, kor dhin muddo fasax qalab iyo badeeco ka keenid Dibadda oo ku meel gaar ah iyo kordhin xubin cusub.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAYA: Oggolaanshaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

Wuxuu Soo Saarayaa Sharciga Soo Socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa loo rogay Sharci Xeerka sharci lambar 3 ee 8 Maarso 1984 kordhin muddo fasax qalab iyo ba deeco ka keenid Dibadda oo ku meel gaar ah, isagoo Qodobka 1aad ee Xeer Sharciga lagu kordhiyay xubin labaad oo loo akhriyi doono sidatan.

2. Haddii badeecad horay loo dalbay ay dib uga dhacdo muddada Sharcigan oggol yahay, Wasaaradda Ganacsigu waxay hubineysaa oo kaliya in badeecadaas la dalbay muddada Sharcigan ku tilmaaman gudaheeda kadibna way fasaxaysaa.

Qod. 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa 15 maalmood kad dib marka lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jam.

Muqdisho, 28 Mar. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

QAYBTA LABAAD

## XEER

Dekreeto N· 12 ee 25 Jen· 1984

Meel marin Wadiiqadaha kalfadhigii Shirka Guud ee Ururaka Boostada Caalamiga (U·P·U·) Shirka Rio De Janeiro 1979·—

MADAXWEYNAHA J·D·S·

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J·D· Soomaaliya·

ISAGOO ARKAY: Wadiiqadaha Ururka Boostada Caalamiga Kalfadhigii Shirka Bio De Janeiro 1979·

ISAGOO ARKAY: Qod· 25aad Wadiiqadaha kor ku xusan oo faraya in Dawladaha xubin ka ah Ururkaas in ay meel mariyaan Wadiiqadahaas·

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta·

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay tahay in wadiiqadaha la meel mariyo, mar haddii JDS Ay xubin ka tahay Ururkaas kana qayb gashay Kalfadhigaas·

Qod· 1aad

Waxaa la meel mariyey lana oggolaaday wadiiqadaha Ururka Boostada Caalamiga ah Shirka Guud Rio De Janeiro 1979, waa kuwa soo cocda·

1) Xeer Nidaamiyaha Guud ee Ururka Boostada Caalamiga ah·

2) Heshiiska Ururka Boostada Caalamiga ah·

3) Heshiiska Guntimaha Boostada·

Qod· 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas'uul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta wadiiqadaha kor ku xusan:

Qod· 3aad

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam· Dim· Soomaaliya·

Muqdisho, 25 Gen· 1984

WASIIRKA W· BOOSTADA IYO ISGAARSIINTA
Dr· Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J·D·S·

Decree No. 12 on 25 Jen. 1984 Instruments of ratificati on of the U.P.U. Convention Rio De Janeiro 1979.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Constitution of the Somali Demo cratic Republic.

HAVING SEEN: The Acta of the Universal Postal Union (U.P.U.) Rio De Janeiro Congrees 1979.

HAVING SEEN: Art. 25 whereas the of aforesaid con vention Provides that it shall be ratified by member countries of the Union.

HAVING HEARD: The Proposal of the Minister of Po sts and Telecomminications.

TAKING INTO CONSIDERATION: The necessity to ratify the aforesaid convention whereas the Somali Democratic Republic has partecipated as member country of the Union.

ART. 1

The Following Actu of the Uuivursal Postal Union signed at Rio De Janeiro congress on 26th Octobar 1979 are hereby ratified an confirmed:

1. Ceneral Reculations of the Universal Posal Union
2. Convention Universal Postal Convention.
1. Postal Barceis Agreements.

ARTCLE 2

The Ministry of Posts and Telecommincations shall be responsible ot put into effect the rules contanied in the aforessid Acts.

ARTICLE 3

This Decree shall be published in the official Bule ttin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 25 Gen. 1984

Minister of Posts and Telecommnications
Dr. Abdulahi Osoble Siad

THE PRESIDENT
Major Gen. Mohamed Siad Barre

Dekreeto 13 ee 25 Jen. 1984 meel marin Heshiis Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah (I.T.C. Convention) Kal fadhigii Shirka NAIROBI 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Wadiiqadaha heshiiska Ururka Is gaarsiinta Caalamiga ah Shirka NAIROBI 1982.

ISAGOO ARKAY: Qod. 45aad heshiiska ujeeddada sa re ku xusan oo faraya in Dawladaha xubin ka ah Ururkaasi in ay meel mariyaan Heshiiskaas.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaarad da Boostada iyo Isgaarsiinta.

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay ta hay in wadiiqadaha Shirkaas la meel mariyo, mar haddii J.D.S. Ay xubin ka tahay Ururkaas kana qayb gashay Kalfadhigaas.

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyey heshiiska Ururka Isgaar siinta Caalamiga ah (I.T.U. Convention) lagu saxiixay Kalfadhigii Shirka NAIROBI, 1982.

Qod. 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas' uul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta Heshiiska kor ku xusan.

Qod. 3aad

Xeerkan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmi ga ah ee Jam. Dim. Soomaaliya.

Muqdisho, 25 Gen. 1984

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S Gaas Maxamed Siyaad B

Decree No. 13 on 25 Jen. 1984 Instruments of ratification of the ITU Convention NAIROBI Congress 1982.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The constitution Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Acts of the international Tele communications Union I.T.U. Convention Nairobi Congrees 1982.

HAVING SEEN; Art. 45 whereas the aforesaid conve ntion provids that it shall be ratifeid by member co untries of the Union.

HAVING HEARD: The proposal of the Minister of and Telecommunications.

TAKING INTO CONSIDERATION: The necessity to ratify the aforesaid convention signed by the ple nipotentiaries of the Somali Democratic Republic at NAIROBI on 6th November 1982.

Art. 1

The Convention of the International Telecommuni cations Union (ITU) signed at NAIROBI Congress 1982 is hereby ratified.

Art. 2

The Ministry of Posts and Telecommunications shall be responsible to put into effect the rules contai ned in the aforesaid Convention.

Art. 3

This Decree shall be published in the Official Bul lettin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 24 Gen. 1984.

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Major/Gen. Mohamed Siad Barre

Minister of Posts and
Telecommunications
(Dr. Abdullahi Ossoble Siad)

Dekreeto 14 ee 25 Jen. 1984 meel marin Wadiiqadaha Kalfadhigii Ururka Boostada Carbeed ee 11aad Shirka BAQDAAD 1980.

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Wadiiqadaha Kalfadhigii Ururka Boostada Carbeed ee 11aad Shirka BAQDAAD 1980,

ISAGOO TIXGELIYEC: Talada Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay tahay in Wadiiqadahaas la meel mar yo mar haddii J.D.S. ay xubin ka tahay Ururkaas.

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay lana ogolaaday wadiiqadaha Kalfadhigii Ururka Boostada Carbeed ee 11aad Shirka BAQDAAD 1980 waana kuwa soo socda.

1. Xeer Nidaamiyaha soo Kordhay.
2. Heshiiska Boostada Carbeed iyo Nidaamkiisa Guud.
3. Heshiiska Guntimaha Carbeed.
4. Go'aannada iyo Dardaaranada.

Qod. 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas'ul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta wadiiqadaha kor ku xusan.

Qod. 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee J.D. Soomaaliya.

Muqdisho, 25 Gen. 1984

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S.Gaas Maxamed Siyaad Barre

القانون رقم ١٥ — ٢٥ يناير ١٩٨٤

الموضوع : تصديق على الاتفاقية الاتحاد العربي للاتصالات السلكية واللاسلكية موتمر تونس — الحمامات عام ١٩٨١

جمهورية الصومال الديمقراطية

الرئيس

بعد الاطلاع : الدستور جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطلاع : اتفاقية الاتحاد العربى للاتصالات السلكية واللاسلكية موتمر تونس الحمامات عام ١٩٨١ .

بعد الاطلاع : المادة الثانية والعشرون من الاتفاقية الاتحاد العربى للاتصالات السلكية .

وهو يهتم : اقتراحات وزير وزارة البريدوالمواصلات السلكيةواللاسلكية

بعد الاعتراف : ضرورة المصادقة على هذه الاتفاقية مادام جمهورية الصومال الديمقراطية عضوه فى الاتحاد العربىللاتصالات السلكية واللاسلكية .

المادة رقم ١

صدقت ووافقت اتفاقية الاتحاد العربى للاتصالات السلكية واللاسلكية موتمر تونس — الحمامات عام ١٩٨١ .

المادة رقم ٢

وزارة البريد والمواصلات السلكية واللاسلكية مسئولة علىتنفيذ وتطبيق الاتفاقية المذكورة اعلاه .

المادة رقم ٣

ينشر هذا القانون فى الاعلام الرسمى فى الجمهورية الصومال الديمقراطية

التاريخ مقديشو ٢٥ يناير ١٩٨٤

رئيس الجمهورية
الرفيق : محمد سياد برى

وزير وزارة البريد والمواصلات
السلكية واللاسلكية

Dekreeto Lr. 15 ee 25 Jen. 1984. Meel marin heshiis ka Ururka Isgaarsiinta Carbeed Shirka TUUNIS (ALXAMMAAMAAT) 1981.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Ururka Isgaarsiinta Car beed Shirka TUUNIS (ALXAMMAAMAAT) 1981.

ISAGOO ARKAY: Qod. 22aad ee Heshiiska Ururka Is gaarsiinta Carbeed ee kor ku xusan.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay ta hay in Heshiiskaas la meel mariyo mar hadii J.D.S. ay xubin ka tahay Ururkaas.

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay lana ogolaaday heshiiska Uruka Isgaarsiinta Carbeed Shirka TUUNIS (AXAM MAAMAAT) 1981.

Qod. 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas' uul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta heshiiskaas kor ku xusan.

Qod. 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Ras miga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

Muqdisho. 25 Gen. 1984

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S.Gaas Maxamed Siyaad Barre

القانون رقم ١٤ — ٢٥ يناير ١٩٨٤
الموضوع / تصديق على الوثائق موتمر بغداد الحادى عشر للاتحـاد البريـد العربـى عـام ١٩٨٠م

جمهوريـة الصومـال الديمقـراطية

السـرئيـس

بعد الاطلاع : الدستور جمهورية الصومال الديمقراطية

بعد الاطلاع : وثائق موتمر بغداد الحادى عشر للاتحاد البريد العربـى

وهو يهتم : اقتراحات وزير وزارة البريد والمواصلات السلكية واللاسلكية

بعد الاعتراف : ضرورة المصادقة على هذه الوثائـق مادام جمهوريـة الصومال الديمقراطية عضوه فى الاتحاد البريد العربـى

المـادة رقـم ١

صدقت ووافقت وثائق موتمر بغداد الحادى عشر للاتحاد البريد العربى لعام ١٩٨٠ كالاتـى ة

١ — البروتوكول الاضافى
٢ — اتفاقية البريد العربية ونظامها التنفيذى
٣ — اتفاق الطرود العربى
٤ — القرارات والتوصيات

المـادة رقـم ٢

وزارة البريد والمواصلات السلكية واللاسلكية مسئولة على تنفيذ وتطبيق الوثائق المذكورة اعـلاه .

المـادة رقـم ٣

ينشر هذا القانون فى الاعلام الرسمى فى الجمهورية الصومـال الديمقراطيـة

التاريـخ مقديشـو ٢٥ يناير ١٩٨٤

رئيـس الجمهوريـة
الرفيـق : محمـد سيـاد بـرى

وزيـر وزارة البريـد والمواصـلات السلكيـة واللاسلكيـة

Dekreeto 16 ee 25 Jen. 1984 meel marin Wadiiqadaha HeshiiskaUrurka Boostada Afrikaanka (Pan African Postal Union) (PAPU) Kaiiadhigii ARUSHA Jannaayo 1980.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Wadiiqadaha Ururka Boostada Afrikaanka Kahadhigii Shirka ARUSHA Jannayo 1980

ISAGOO ARKAY: Qod. 23aad ee heshiiska kor ku xusan oo faraya in Dowladaha xubin ka ah Ururkaas inay meel mariyaan heshiiskaas.

ISAGOO TIXGELIYAY: Talada Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

ISAGOO AQOONSADAY: In lagama maarmaan ay tahay in la meel mariyo heshiiska kor ku xusan oo saxiixay wafdi metelaya J.D S. laguna saxiixay ARUSHA 17ka Jannaayo 1980.

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay heshiiska Ururka Boostada Afrikaanka (P.A.P.U. Convention) lagu saxiixay Shirka ARUSHA 1980.

Qod. 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas'uul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta wadiiqadaha ka kooban Heshiiska kor ku xusan.

Qod. 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimoqradiga Soomaaliya.

Muqdisho. 25 Gen. 1984

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Decree No. 16 on 25 Jen. 1984.
Instruments of ratification of the PAPU Conven tion ARUSHA, 1980

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The constitution of the Somali Demo cratic Republic;

HAVING SEEN: The Acts of the Pan African Postal Union (PAPU) Arusha congress January, 1980;

HAVING SEEN: Art. 20 whereas the aforesaid con vention provides that it shall be ratified by mem ber countries of the Union;

HAVING HEARD: The proposal of the Minister of Posts and Telecommunications;

TAKING INTO CONSIDERATION: The necessity to ratify the aforesaid convention signed by the Ple nipotentiory of the Somali Democratic Republic at Arusha on 17th January, 1980.

Adt. 1

The convention of the Pan African Union (PAPU) signed at Arusha congress January, 1980 is hereby ratified.

Art. 2

The Ministry of Posts and Telecommunications shall be responsible to put into effect the rules contai ned in the aforesaid convention.

Art. 3

This Decree shall be published in the Official Bule ttin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 25 Gen. 1984.

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Major/Gen. Mohamed Siad Barre

The Minister of Posts and
Telecommunications

Dekreeto 17 ee 25 Jen. 1984 meel marin iyo ku biirid Wadiiqadaha heshiiska Ururka Isgaarsiinta Afrikaanka (Pan African Telecommunication) (P.A.T.U.) Kalfadhigii Shirka KINSHASA Jannaayo 1982.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dast rka J.D. Soomaaliya.

ISAGOO ARKAY: Wadiiqadaha Ururka Isgaarsiinta Afrikaanka (P.A.T.U.) ka soo baxay KINSHASA Jannaayo 1982.

ISAGOO ARKAY: Qod. 24aad iyo 25aad ee heshiiska kor ku xusan oo farayaan in Dowladaha xubin ka ah in ay meel mariyaan kuna biiraan kuwa aan soo saxiixin heshiiskaas.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta.

ISAGOO AQOONSADAY: In ay tahay lagama maarmaan in la meel mariyo heshiiska kor ku xusan la guna biiro bacdamaa J.D.S. Ay xubin ka tahay Ururka Midawga Afrika (O.A.U.)

Qod. 1aad

Heshiiska Ururka Isgaarsiinta Afrikaanka Shirka KINSHASA Jannaayo 1982 waa la meel mariyay waana lagu biiray.

Qod. 2aad

Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta waxay mas'uul ka tahay fulinta iyo dhaqan gelinta heshiiskaas kor ku xusan.

Qod. 3aad

Xeerkaan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jam. Dim. Soomaaliya.

Muqdisho. 25 Gen. 1984

Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta
Dr. Cabdulaahi Cosoble Siyaad

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Decree No. 17 on 25 Gen. 1984.

Instruments of ratification and accesion to the convention of the PATU KINSHASA congress January, 1982.

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

THE PRESIDENT

HAVING SEEN: The Constitution of the Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN: The Acts of the Pan African Telecommunications Unions (PATU) Kinshasa January, 1982;

HAVING SEEN: Art. 24 and 25 whereas the aforesaid convention provides that it shall be ratified by member countries of the Union and the accesion to the convention member States which have not signed;

HAVING HEARD: The proposal of the Minister of Posts and Telecommunications;

TAKING INTO CONSIDERATION: The necessity to ratify the aforesaid convention and to access to the convention whereas the Somali Democratic Republic is member state of the O.A.U.

Art. 1

The convention of the Pan African Telecommunications Union (P.A.T.U.) Kinshasa congress January, 1982 is hereby ratified and acceed.

Art. 2

The Ministry of Posts and Telecommunications shall be responsible to put into effect the rules contained in the aforesaid convention.

Art. 3

This Decree shall be published in the Official Bullet tin of the Somali Democratic Republic.

Mogadishu, 25 Gen. 1984.

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Major/Gen. Mohamed Siad Barre

The Minister of Posts and
Telecommunications
(Dr. Abdullahi Ossoble Siad)

Xeerka Madaxweynaha J.D.S. Lambar 18 taariikh 22 Maarso 1984 meel marin heshiis ku saabsan Abuurid Sanduuq la—wadaago ee Badeecadaha.—

MADAXWEYNAHA JDS,

MARKUU ARKAY: Qod. 67aad faqradda 5aad iyo qod 82aad, faqradda 4aad ee Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Sharciga tirsigiisu yahay 18 taariikh 22.3.84 oo Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbigu ku oggolaaday heshiiska Xeerkan ku Tilmaaman.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay lagama maarmaan tahay in heshiiskaas la meel mariyo.

WUXUU Soo Saarayaa Xeerka Soo Socda:

Qod. 1aad

Waxaa la meel mariyay ku biiridda J.D. Soomaaliya Heshiiska ku saabsan Abuuridda Sanduuqa la—wadaago ee Badeecadaha oo lagu guddoonsaday magaalada Jineva ee Dalka Svizzera taariikhdu markay ahayd 27 Juunyo 1980.

Qod. 2aad

Heshiiskaas wuxuu dalka JDS ku yeelanayaa astaan Sharci ah.—

Qod. 3aad

Xeerkan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 22 Mar. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.
S.Gaas Maxamed Siyaad Barre

Decree No. 18 of 22 March 1984.

Instrument of ratification.

THE PRESIDENT

HAVING SEEN Article 67 (5) and Article 82 (4) of the Constitution of Somali Democratic Republic;

HAVING SEEN Law No. 18 of 22.3.84 on the base which the People's Assembly has approved the Agreem ent specified in this Decree;

HAVING CONSIDERED the necessity to ratify this Agreement;

HEREBY PROMULGATED
the following Decree:

Article 1

The ACCESSION of the Somali Democratic Repub lic to the AGREEMENT ESTABLISHING the COMMON FUND FOR COMMODITIES adopted at Geneva on 27 June 1980 is hereby ratified.

Article 2

The Agreement shall have force of law in the Ter ritory of the Somali Democratic Republic and shall en ter into force in accordance with Article 56 of the Ag reement.

Article 3

This Decree shall come into upon the date of it's pubblication in the Official Bulletin.

Mogadishu 22 Mar. 1984.

THE PRESIDENT OF S.D.R.
Major/Gen. Mohamed Siad Barre

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 19 ee 1 Mar. 1984 Ku wareejin Waaxda isku Duuwidda Qorsheynta Qaranka lagu wareejiyey Wasaaradda Arrimaha Dibadda.

ANNAGOO ARAGNAY: Dastuurka J.D. Soomaaliya

ANNAGOO ARAGNAY: Sharciga ay ku dhisantahay Jam. Dim. Soomaaliya oo la socda ruuxa Kacaanka.

ANAAGOO ARAGNAY: Sharciga ay ku dhisantahay Dawladdu Sharci lambar 14 ee 3dii J nyo 1962.

MARKUU ARKAY: Baahida loo qabo in la mideeyo Shaqada.—

MARKUU ARKAY: Aqoonsadayna inay lagama maar maan tahay in shaqada Wasaaradda Arrimaha Di badda iyo kaalmada J.D.S. Dibadda ka hesho ina yan kala hari karin.—

MADKUU ARKAY: In arrintaas muddo dheer dhibaa tadeedu muuqatay, taasoo kala dhantaashay isku duubnida iyo mideyntii danaha Dawladdu ka lahayd

MARKUU IN BADAN: ka fiirsaday talada Wasaarad da Arrimaha Dibadda:

WUXUU Soo Saarayaa Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waaxda isku duwidda ee Wasaaradda Qorsheynta Qaranka waxaa lagu wareejiyay Wasaaradda Arrimaha Dibadda, iyada iyo shaqaalaha ka shaqeeya dhammaan tood & Miisaaniyadooda.

Qodobka 2aad

Wasaaradda Qorshaynta Qaranka waxaa laga bed delay magaceedii hore, waxaana loo bixiyay Wasaarad da Qorshaynta iyo Tirokoobka (Ministry of Planning and Statistics).

Qodobka 3aad

Waxaa laga abuurayo Wasaaradda Arrimaha Dibad da waxay qaadan doontaa magaca ah Waaxda Iskaashi ga Dhaqaalaha ee Wasaaradda Arrimaha Dibadda (De

partment of Economic Co—operation in the Ministry of Foreign Affairs).

Qodobka 4aad

Wixii sharci ahaa ee ka horjeeday midkaan, waa la baabi'iyay.

Qodobka 5aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa markuu Madax weynaha J.D.S. Saxiixo.—

Muqdisho, 1 Mag. 1984

MADAXWEYNAHA J.D.S.

S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

Xeer Wasaaradda Hiddaha iyo Tacliinta Sare L. 2 ee 4.3.84 Abuuritaanka Kulliyadda Macallimiinta Far samada

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE JUS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J. D. Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Soo jeedinta Guddiga Sare ee Jaamacadda.

MARKUU ARKAY: Talada Golaha Tacliinta ee Jaa macadda Ummadda Soomaaliyeed.

MARKUU ARKAY: Qodobka 15aad xubinta 7aad ee Sharciga lamb. yahay 72 ee 7 Sebtembar 1977kii, (Sharciga Jaamacadda).

ISAGOO TIXGELIYEY: Baahida loo qabo Macalli miin aqoon farsamo leh.

WUXUU SOO SAARAY XEERKA SOO SOCDA

Qodobka 1aad

Abuuritaan

Waxaa la abuuray Kulliyadda lagu magacaabo (Kulliyadda Macallimiinta Farsamada). Kulliyaddaas waxay ka mid tahay Kulliyadaha JaamacaddA Um madda Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

Barnaamijka Waxbarashada ee Kulliyadda waxaa lagu soo saarayaa Xeer Hoosaad uu guddoonsado Go laha Tacliinta ee Jaamacadda.

Qodobka 3aad

Xeerkani wuxuu dhaqan galayaa marka uu ku soo boxo Faafinta Rasmiga ah ee J.D. Soomaaliya.

Muqdisho, 4.3.84

GUDDOOMIYAHA GOLAHA SARE EE J.U.S.
Dr. Cabdiqaasim Salaad Xasan

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 3063 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 4.000 iska lahaa Maryan Xasan Weheliye sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 266 taariikhdeedu 25.4.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 3063 oo ku qoran magaca Maryan Xasan Weheliye ayna ku jirto Sh.So. 4.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Hodon u bedelo Buuga Keyd ee kor ku tilmaaman un asameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 29.4.84.

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 134

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 20662 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta kuna qoran lacag dhan Sh.So. 2.277,00 iska lahaa Xuseen Guuleed Cali sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 00918 taariikhdeedu 17.4.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Xarunta

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 20662 oo ku qoran magaca Xuseen Guuleed Cali ayna ku jirto Sh.So. 2.277,00

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta u bedelo B ga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortag laga keenin.

Muqdisho, 17.4.84.

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L 135 .

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 1036/83 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 1.000 uu iska lahaa Saciid Cusmaan Jumcaale sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 0000463 taariikhdeedu 8.3.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta 2aad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 1036/83 oo ku qoran magaca Saciid Cusmaan Jumcaale ayna ku jirto Sh.So. 1.000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 8.3.84

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 136

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 3317 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon kuna qoran lacag dhan Sh.So. 1.000 uu iska lahaa Maxamed Xaashi Cilmi sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay —— taariikhdeedu 30.4.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Keyd Lam. 3317 oo ku qoran magaca Maxamed Xaashi Cilmi ayna ku jirto Sh.So. 1.000

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Hodon u bedelo Buuga Keydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 3.5.84

GUDDOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 137

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 514115 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka kuna qoran lacag dhan Sh.So. 40.000 uu iska lahaa Saalax Saa lim Saciid sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 005426 taariikhdeedu 19.5.84 ee Bankiga Ganac siga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 514115 oo ku qoran Saalax Saalim Saciid ayna ku jirto Sh.So. 40.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka u bedelo Jeega War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo waree gto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aa nka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.5.84.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 138

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J. W. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 607422 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomliyeed laanta Kismaayo kuna qo ran lacag dhan Sh.So. 25.000 uu iska lahaa Saajac Cabaas Markhaat sida ku cad warqadda lambarkee du yahay 005426 taariikhdu 19.5.84 ee Bankiga Ga nacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Kismayo

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 607422 oo ku qoran Saajac Cabaas Markhaat ayna ku

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed jirto Sh.So. 25.000.

laanta Kismaayo u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wa reegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go' aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Had dii int ka horaynsa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.5.84.

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdulaahi Maxamed Maax

L. 139

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In J· W· Dhumay oo lambarkiisu ahaa 514116 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka kuna qoran lacag dhan Sh·So· 40·000 uu iska lahaa Saalax Saa lim Saciid sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 0005426 taariikhdu 19·5·84 ee Bankiga Ganacsi ga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka·

HADDUU ARKAY: Qod· 69 sharciga lam· 2 ee 9·9·65·

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War· Lamb· 514116 oo ku qoran Saalax Saalim Saciid ayna ku jirto Sh·So· 40·000·

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Marka u bedelo J· War· ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J·D·S· Haddii in ta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin·—

Muqdisho, 19·5·84·

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB· BANAADIR
Dr· Cabdulaahi Maxamed Maax

L· 140

MAXKAMADDA GOBOLKA SH/HOOSE MARKA

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Buugga Kaydka Lam. 2581, lagana soo saaray Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka, kuna qorneyd lacag dhan Sh.So. 7.020/= (Toddoba Kun iyo Labaatan Shilin) uuna lahaa Max'ed Nuur Muuse sida ku cad warqadda Taariikhdeedu tahay 19.5.84, kana soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buugga Kaydka Lam. 2581 kuna qoran Maxamed Nuur Muuse ayna ku jirto Lacag dhan Sh.So. 7.020/= (Toddoba Kun iyo Labaatan Shilin).

WUXUU AMRAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Marka u bedesho Maxamed Nuur Muuse Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aankan lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Marka. 20.5.1984

GUDD. MAX. GOBOLKA SH/HOOSE
(Maxamed Keynaan Warsame)

L. 141

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In Jeeg War. Dhumay oo lambar kiisu ahaa 371933 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho kuna qoran lacag dhan Sh.So. 50.000 uu iska lahaa Ciise Faahiye Samantar sida ku cad warqadda lambarkeedu 005477 taariikhdu 21.5.84 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga lam. 2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. Lamb. 371933 oo ku qoran Ciise Faahiye Samantar ayna ku jirto Sh.So. 50.000.

WUXUU FARAYAA

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Qardho u bedelo J. War. ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka karayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horaysa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 21.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 142

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

HADDUU ARKAY: DACWADDA KOR KU QORAN:

HADDUU ARKAY: In B. K. Dhumay oo lambarkiisu ahaa 114 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad kuna qoran lacag dhan Sh.So. 4000 uu iska lahaa Maxamed Xa san Axmed sida ku cad warqadda lambarkeedu ya hay 0000635 taariikhdeedu 22.5.84 ee Bankiga Gana csiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta Labaad.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buuoo Keyd Lam. 114 oo ku qoran magaca Maxamed Xasan Axmed ayna ku jirto Sh.So. 4000.

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed laanta labaad u bedelo B.K. ee Kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii in ta ka horaysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 22.5.84

GUDDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 143

DAWLADDA HOOSE EE MUBDISHO

WAAXDA DHULKA RASMIGA AH

NAADO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cali Boobo Faqay uu u soo qortay Arji Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee Dawladda Hoose ee Muqdisho maalinta taariikhdu ahayd 1dii Jen. 1983 uu ku weydiistay Gabal dhul Dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho Deg. Wadajir Qaabkii suna yahay Retangolaare Addimihiisuna yihiin 40X30 kuna fadhiya 1.200/= MQ.

SOOHDIMIHIISUNA YIHII DA HOOS KU QORAN

Waqooyi waxaa ka xiga. Dhul Lamb. 84 W.

Koonfur waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 51 W.

Galbeed waxaa ka xiga: Waddo

Bari waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 63 W. 74 W.

Qofkii danaynaaya dhulkaa waxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Dhulka Rasmiga ah ee D/Hoose Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) (soddon maalmood ah) laga bilaabo maalinta lagu soo qoro Buugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.

Muqdisho. 25 Mag. 1983

L. 144

MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

GUDDOOMIYAHA MAX· G/MUDUG KA DIB:-

MARKUU ARKAY: Arjiga uu ss qortay Jaalle Jaalle Cabdikariim Maxamuud Cilmi oo Taariikhdiisu tahay 22.5.1984 oo uu ku caddeeyey in uu ka Lumay Jeeg Wareega L. 279961 la qoray 13.5.1984 ayna ku qorrayd Lacag dhan Sh. So. 20.000 (Labaatankun) Shilin, uuna ka qaatay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeedee Laanta Gaalkacyo;

MARKUU ARKAY: Warqadda L. 1708 ee 24.5.1984 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soo maaliyeed Laanta Gaalkacyo ayna ku caddeeyeen in uu Jeeggaas ka qaatay;

MARKU UARKAY: Xeer-Sharci L.2 Qod. 69aad soona baxay 9.9.1965kii.

WUXUU CADDAYNAYAA

Lumidda Jeegga L. 279961 ee 13.5.1984 ayna ku qoran tahay Lacag dhan Sh.So. 20.000 (Labaatankun) uuna lahaa Cabdikariim Maxamuud Cilmi.

WUXUU AMRAYAA

In loo sameeyo Ninkaas Jeeg Cusub ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda ayna ka soo wareegto 15 Maalmood haddii aan cid kale la sheegan, waana in Jeegga Cusug oo la sameyn doono isaga Gacanta laga saaro amase cid wakaalad Sharci ah ka sidata, iyadoo la sugayo muddada 15ka maalmood ah oo aan kor ku soo sheegnay.

Gaalkacyo, 26.5.1984

GUDDOOMIYAHA MAX. G/MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 145

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In J. Wareega dhumay oo Lambarkiisu ahaa 405062 lagana soo saaray Banggia Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco kuna qoran lacag dhan Sh.So. 20.000/= uu iska lahaa Qaali Aadan Wacays sida ku cad warqadda lambarkeedu 005615 taariikhdu 24.5.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Burco;

HADDUU ARKAY: Qod.69 Sharciga Lam.2 ee 9.9.65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J.Wareega Lam. 405062 oo ku qoran Qaali Aadan Waceys ayna ku jirto Sh.So. 20.000/=.

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Burco u badalo J.Wareega ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka soo muddo aan ka yarayn 15 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.5.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 146

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: In Buug Kayd dhumay oo lambarkiisu ahaa 493 lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeeeed Laanta Wadajir kuna qoran lacag dhan Sh.So. 23.200/= uu iska lahaa Ibraahim Gacal Wardheere sida ku cad warqadda lambarkeedu yahay 000127 taariikhdeedu 27.5.84 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir;

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd Lam. 493 oo ku qoran magaca Ibraahim Gacal Wardheere ayna ku jirto Sh.So. 23,200/=

WUXUU FARAYAA

In Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wadajir u badalo Buugga Kaydka ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah kadib markay ka wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta Go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horaysa aan ishortaag laga keenin.

Muqdisho, 27.5.84

GUDDOOMIYAHA MGB
Dr. Cabdullaahi Maxamed Rooble

L. 147